# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

*JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA*

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 8aad    Muqdisho    24 Febraayo 1980 — Lr 3 R 2

*FAAFINTA BIL SOO BAXA*    جريدة شهرية

*Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.*

QIIMAHA : waa 5 shilin lambar walba RUKUNKA : Sanalkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibedana waa Sh. So, 300, Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qorotaanka F. R, halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

KOOBNIIN

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 5 ee 2 Febraayo 1980, Sharciga Shaqaalaha Dawlada. Bogga 216

QAYBTA LABAAD

XEER

W. M.

QAYBTA SEDDEXAAD

SAXID QALAD (Eeg Bogga 274)

Wakaaladda Madbacadda Qaranka

SHARCI L. 5 ee 2. 2. 1980 Sharciga Shaqaalaha Dawladda.

MADAXWEYNAHA J. D. S.

ISAGOO ARKAY : Qod 82aad 111aad iyo 113 ee Dastuurka Jamhuuriyadda Dimooqraadiga Soomaaliya;

ISAGOO AQOONSADAY : Inay tahay lagama maarmaan in Shaqaalaha Dawladda loo sameeyo sharci mideysan waxna laga beddelo qaar kalana lagu daro;

ISAGOO DHEGEYSTAY : Taladii Wasiirka Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshadda;

ISAGOO TIXGELIYAY : Go'aankii Golaha Dhexe ee XHKS taariikhdiisuna ahayd 11. 10. 1979.

WUXUU SOO SAARAYAA

*Sharciga soo socda :*

QAYBTA 1AAD

QODOBBO GUUD

QODOBKA 1AAD

CADAYN

Ereyada soo socda, haddaan sharciga gudahiisa si kale loogu fasirin, waxaa loola jeedaa sida erey kasta ku dhinac qoran

— Golaha Wasiirada wuxuu ka kooban yahay : Madaxweynaha JDS iyo Wasiiradda oo dhan.
— «HEER» waxaa loola jeedaa darajooyin is leh oo is raacsan sida lagu tilmaamay qod 4aad ee sharcigan;
— «Qoys» wuxuu ka kooban yahay qofka Shaqaalaha ah iyo afadiisa/ninkeeda iyo caruurtiisa/carruurteeda aan qaan-gaar ahayn.
— «Darajo» waxa loola jeedaa qaybaha heerarka loo kala saarayo.
— «Madaxda Hayadda» waxaa loola jeedaa :

b) Madaxweynaha J. D. S. marka laga hadlayo Madaxtooyada J. D. S.

t) Wasiirka Wasaaradda qaabilsan.

j ) Sarkaalka u madax ah hay'ad aan wasaarad hoos imaan.

k) «Mushahar» waxa loola jeedaa lacagta uu shaqaaluhu bil walba xaq u leeyahay in la siiyo, sida ku cad lifaaqa 1aad ee Sharcigaan.

«Hay'ad dawladeed» waxaa loola jeedaa Madaxtooyada J. D. S. Wasaarad, Wakaalad, Warshad, Dawladda Hoose, Bankiga ama Mashruuc Dawladdu leedahay ama qayb ku leedahay.

«Hawl qaran» waxaa loola jeedaa Hawl kasta oo qaraanku iska leeyahay kana tarjumaysa danta guud ee dalka. Hawsha iskaa wax u qabso waxa loo aqoonsan yahay hawl qaran.

## QODOBKA 2AAD

## SAAMAYN

1) Sharcigani wuxuu saamaynayaa shaqaalaha joogtada ah ee Dawladda.

2) Sharcigani ma saamaynayo :

b) Shaqaalaha aan joogtada ahayn ama kuwa heshiis leyda ah.

t ) Shaqaalaha ka tirsan hay'adaha lacagta iyo shirkadaha.

j ) Dadka ka tirsan Ciidamada Qalabka sida iyo kuwa ciidan ahaanta u habaysan.

## QAYBTA II

## QAABKA

## QODOBKA 3AAD

(1 Jago kasta waxay yeelan doontaa darajo, waajibaad iyo mas'uuliyad lagu aqoonsanayo magac koobn.

2) Tirada guud ee jagooyinka hayadda ee loogu tala galay miisaaniyadda Dawladda iyo jagooyinka aan lacag loogu tala gelini waxay isku wada noqonayaan qaabka hayaddaas.

## QODOBKA 4AAD

## HEERARKA

1) Waxa jiri doona heerarka soo socda :
— Heerka «A» iyo «AY» maamule iyo aqoon yahan.
— Heerka «B» Fuliye.
— Heerka «F» Farsamayaqaan oo ah qofka haysta shahaado Dugsi Sare iyo mid ka sareysa ee farsamo ama shahaado u dhiganta.
— Heerka «C» karaani.
— Heerka «X» xirfadle ama shahaado qiimayn xirfadeed
— Heerka «D» Adeege, Ilaaliye iwm.
2) Heer kastaaba wuxuu yeelaan doonaa mushaarada iyo darajooyinka ku tilmaaman lifaaqa 1aad ee sharcigan.

## QAYBTA III

## SHAQO SIINTA

## QODOBKA 5AAD

U shaqaynta Dawladda, marka laga saaro Ciidamada Qalabka sida iyo kuwa Ciidan ahaan u habaysan, waxa lagula dhaqmayaa sida uu dhigayo sharcigan; hase yeeshee, Madaxweynaha J. D. S. wuxuu awood u leeyahay marka :

b) baahi weyni jirto ama

t) maslaxadda qaranka ay ku jirto.

j) iyo marka ay jiraan waxyaalo kale oo gaar ah inuu amro qorniin shaqaale iyadoo aan la marin habka uu dhigayo sharcigani.

## QODOBKA 6AAD

## SHURUUDAHA LAGA DOONAYO QOFKA LA QORAYO

Qof kastoo shaqo Dawladeed la siinayoo waa :
1) Inuu ahaado Soomaali

2) In da'diisu ayan ka yarayn 15 sano.

3) Inuu Caafimaad taam ah qabo.

4) Inuu asluub wanaagsan lahaado

5) Inuusan aheyn qof xafiisyada Dawladda looga reebay xukun ku dhacay awgii «Interdetto».

6) Inuu lahaado shahaadooyinka looga baahan yahay jagada loo qaadanayo, kuwaasoo kala ah:

i) Shahaado Jaamacadeed ama mid u dhiganta, marka jagada, tahay Heerka «A» iyo «AY».

ii) Shahaado dugsiga sare oo caadiga ah ama mid u dhiganta marka jagadu tahay heerka «B 10»

ii) Shahaado dugsiga sare uu la jiro tababar farsamo iyo shaqo aqoon gaar ahaaneed ugu yaraan labo sano waxa lagu qori doonaa darajada «B 9».

iv) Shahaadada Dugsiga dhexe uu la jiro tababar farsamo iyo aqoon gaar ahaaneed ugu yaraan laba sano, waxa lagu qori doonaa darajada «C 10»

v) Shahaadada dugsiga dhexe ama shahaado la mid ah, waxa lagu qori doonaa darajada «C 11».

vi) Inuu heysto caddeyn ah inuu qori karo aqriyina karo af Soomaaliga.

## QODOBKA 7AAD

## GUDDIGA QIIMEYNTA SHAHAADOOYINKA

Si loo ogaado heerka ama qiimaha ay shahaadooyinku leeyihiin, waxa qiimaynaya Guddiga Qiimaynta Shahaadooyinka ee hoos yimaada Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare oo loo xil-saaray hubinta shahaadooyinka la aqoonsan karo.

Guddigu wuxuu ka kooban yahay:

1) Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta sare — Guddoomiye

2) Guddoomiye ku xigeenka Jaamacadda Ummadda Xubin.

3) Agaasimaha waaxda Shaqaalaha ee WASHAB Xubin
4) Agaasimaha Waaxda Qorshaha ee W. Waxbarashada iyo Barbaarinta Xubin.
5) Wakiil ka socda Xiriirka Guud ee Uruurada Shaqaalaha Soomaaliyeed Xubin.

QODOBKA *8AAD*

WEYDIIN QORIS SHAQAALE

1) Hayadaha Dawladda iyo Hayadaha Gaarka ahiba marka ay u baahdaan shaqaale waxay weydiisanayaan Wasaaradda shaqada iyo Arrimaha Bulshada.
2) Wasaaraddu Haddii aanay hayn Shaqaale loo beddeli karo hayadda shaqaalaha soo warsatay waxay weyddiinta ku faafinaysaa Wargeysyada. Qorista Shaqaalaha waxa loo raacayaa habka shaqo qorista shaqaalaha ee Sharcigani tilmaamayo.

QODOBKA *9AAD*

SHAQAALA*HA AAN* AQ*OON* GAAR AH LOOGA BAAHNAYN

Qoritaanka Shaqaalaha aan aqoon gaar ah looga baahnayn oo ay ka mid yihiin Adeegayaasha, Ilaaliyayaasha, iwm. oo loo qorayo hayadaha Dawladda, Shirkadaha iyo Hay'adaha gaar ahaaneed, waxa qoritaankooda u xilsaaran guddiga shaqa qorista ee Goboladda iyo Degmooyinka, kuwaasoo si caddaalad ah u soo xulaya dadka buuxiyey shuruudaha ku xusan qod. 6aad ee Sharcigan iyo kuwa u gaarka ah jagooyinka shaqaalaha loo doonayo.

QODOBKA *10AAD*

*SITAYAASHA SHAHAADADA JAAMACADA*

Qofkii aan horey Dawladda ugu shaqayn jirin ee shaqo warsada, isagoo sita shahaado lagu qiimeeyey Jaamici ama wax u dhigma, waa inuu soo maraa Dugsiga Tababarka ee Xalane, markaa ka bacdina waxa shaqada loo qorayaa isagoo aan soo marin imtixaan tartan ah.

QODOBKA 11AAD

SITAYAASHA SHAHAADADA DUGSIGA SARE.

Sitaayaasha shahaadada Dugsiga Sare ama wax u dhigma oo soo maray dugsiga tababarka ee Xalane, soona gutay waajibaadkii shaqada qaranka waxaa loo qori karaa shaqada iyaga oo aan soo marin imtixaan tartan ah.

QODOBKA 12AAD

SITAYAASHA SHAHAADDADA DUGSIGA DHEXE

1) Sitayaasha Shahaadada Dugsiga Dhexe ama wax u dhigma, waxay shaqada geli karaan marka ay soo maraan kuna guulaystaan imtixaan tartan ah, imtixaanka waxa maamulaya Guddiga Qaranka ee shaqo siinta ee ku xusan Qod. 14aad ee sharcigan.

2) Gudbayaasha imtixaanka ee hayadaha dawladda, ka shaqaynaya waxa la siinayaa tababar maamul iyo hañuunin intaanay shaqada bilaabin ka hor.

QODOBKA 13AAD

SHAQAALAHA XIRFADLAYAASHA AH

1) Shaqo siinta shaqaalaha xirfadlayaasha ah ee aan sidan shahaadooyin, waxay ku xiran tahay imtixaan tartan ah oo uu qaado Guddiga Qaraanka ee shaqo siinta, isagoo la kaashanaya dad aqoon u leh xirfadda imtixaanka loo qaadayo.

2) Manhajka lagu imtixaanayo dadka wuxuu noqonayaa kan u degsan qiimaynta xirfadlayaasha.

3) Xirfadlayaasha imtixaanka gudba ee shaqada la qoro waxa mid kasta lagu mushahar siinayaa heerka xirfadda u gudbey, hase yeeshee xirfadlaha lama siin karo marka u shaqada gelayo wax ka sareeya xirfadle 2aad.

4) Dadka ka gudba imtixaanka ku sheegan Qod. 12aad iyo qodobkan, hase yeeshee aan shaqo loo dirin jagooyinkii oo buuxsamey awgeed, waxa lagu' hayn karaa liiska kaydka ah muddo lix bilood ah. Muddada lixda bilood ah gudaheeda, haddii hay'ad shaqaale u soo warsato jagooyin la mid ah kuwii shaqaalaha kaydka ahi imtixaankooda gudbey, shaqaalaha kaydka ahi imtixaankooda gudbey, waxa shaqada la qori karaa iyaga oo aan imtixaan kale laga qaadin.

QODOBKA 14AAD

GUDDIGA QARANKA EE IMTIXAANKA SHAQAALAHA

Imtixaan kasta oo ku saabsan shaqaale loo qorayo hayadaha Dawladda, Shirkadaha iyo Hayadaha gaar ahaaneed, waxa maamulaya Guddiga Qaraanka ee imtixaanka Shaqaalaha ee ka kooban.

b) Wakiil ka socda Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Guddoomiye.

t) Wakiil ka socda Ururka Shaqaalaha Xubin

j) Wakiil ka socda Ururka Dhallinyarada, Xubin

x) Wakiil ka socda Ururka Haweenka, Xubin

kh) Wakiil ka socda hayada Shaqaalaha loo qorayo Xubin

QODOBKA 15AAD

SHAQAALAHA LOOGA BAAHIDO GOBOLLADA IYO DEGMOOYINKA

Sitayaashaha Shahaadada Dugsiga Dhexe iyo xirfadlayaaaha looga baahdo Gobollada iyo Degmooyinka ka baxsan Muqdisho, waxa qoraya Wakiilada u jooga halkaas hayadaha lagu sheegay Qodobka hore. Jagada hay'addii aan wakiil u joogin waxa buuxinaya Xoghayaha Degmada.

## QODOBKA 16AAD

## CIQAABTA

1) Cid kasta oo qorta shaqaale nooc kasta ha ahaadeene, isagoo aan soo marin habka shaqo siinta ee uu dhigayo sharcigani haddii dembiga uu sameeyey aannu ahayn mid ka culus, waxa lagu qaadayaa dembi ay ciqaabtiisu tahay xarig ilaa 6 bilood ah ama ganaax lacageed oo dhan Sh. So. 1000 ilaa 10.000; ama labadoodda oo laysugu daro, Hase yeeshee xariga lacag waa loogu beddeli karaa.

2) Qofka shaqaalaha ah oo la qoray isagoon la soo marin habka shaqo qoridda ee sharcigani dhigayo waa laga saarayaa shaqada, isagoo aan u dacwoon karin wax xaq ah.

3) Qaadidda dacwooyinka la xiriira Qodobkan qaybtiisa Koowaad waxa ku shuqul leh Maxkamadda Badbaadada Dalka.

## QODOBKA 17AAD

Qoridda shaqaalaha dawladda waxay ku dhaqan gelaysaa Xeer uu saxiixay Madaxweynaha J. D. S. marka qofka loo qaaqaadanayo jago ah Heerka «A» «Ay» B. iyo F. ama xeerka Wasiirka Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada marka heerku yahay C, X, iyo D.

## QODOBKA 18AAD

## DARAJOOYINKA BILOWGA JAAMICIYIINTA LAGU QAADANAYO

1) Sitayaasha shahaado jaamici ah ama wax u dhigma waxa lagu qorayaa darajada «A/8» ee bilowga ah.

2) Aqoonyahannada Jaamiga ah waxa lagu qorayaa darajada «AY3» ee bilowga ah.

3) Jaamiciyiinta mushaharkooda, waxa loo kala sarraysiinayaa hadba sida shahaadadooda iyo aqoontooda waayo aragnimo u kala saarayso.

## QODOBKA 19AAD

## DARAJOOYINKA BILOWGA AH EE FULIYAYAASHA IYO FARSAMAYAQAANADA

1) Qofka sita shahaadada dugsiga sare ee Caadiga ah waxa lagu qorayaa darajada «B 10». Hadduuse qofku dugsiga sare ka dib qaato tababar gaar ahaaneed ugu yaraan laba sano, waxa lagu qorayaa darajada bilowga ah ee «B 9». Hase yeeshee, haddii labada sano ee tababarka gaar ahaaneed ay u wehliso waaya aragnimo tababarka ka horraysay oo aan ka yarayn 3 sano waxa la gaarsiin karaa darajada bilowga ah ee «B 8».

2) Qofka sita shahaadada dugsiga sare ee Farsamada ama qaato tababar gaar ah oo farsamo ugu yaraan hal sano, ka dib markuu dugsiga sare ee caadiga ah dhammeeyey, waxa lagu qorayaa darajada bilowga ah ee «F 3»

## QODOBKA 20AAD

## DARAJOOYINKA BILOWGA EE KARAANIYAASHA

Qofka sita shahaadada Dugsiga Dhexe ee caadiga ah, waxa lagu qorayaa darajada «C 11». Hadduuse qof dugsiga dhexe ka dib qaato tababar aqoon gaar ah, ugu yaraan laba sano, waxaa lagu qorayaa darajada «C 10».

## QAYBTA IV

## TIJAABADA IYO RASMIYAYNTA SHAQO QORIDDA

## QODOBKA21AAD

## MUDDADA TIJAABADA SHAQAALAHA CUSUB

1) Qof kastoo shaqo dawladeed la siiyo wuxuu marayaa muddo tijaabo ah oo aan ka yarayn 6 bilood kana badnayn hal sano.

2) Marka uu billaabayo shaqada madaxa hay'adda waa inuu qoraal ku ogeysiiyo muddada qofku tijaabada ku jirayo, iyo shuruudaha gaarka ah ee looga baahan yahay qiimaynta wax qabadkiisu.

## QODOBKA 22AAD

### SHURUUDAHA SHAQO QORIDDA LAGU RASMIYAYN KARO

1) Qoridda shaqaalaha cusub waxa la rasmiyayn karaa :-

b) Markay dhammaystaan muddadii tijaabada

j) Kana soo baxaan shuruudaha kalee loo dejiyey oo lagu tilmaamay xubinta 2aad ee qod. 21aad.

2) Markay muddada tijaabada dhammaato, madaxa hayada wuxuu caddaynayaa in qofka tijaabada ahi ka soo baxay shuruudihii, ayna habboon tahay in qoridda loo rasmiyeeyo.

## QODOBKA 23AAD

### SHAQO KA SAARIDDA QOFKA TIJAABADA KU JIRA

Shaqaalaha cusub ee muddada tijaabada ku jira, madaxa hay'adda oo ay wehliyaan guddiga shaqaalaha waa ka saari karaan shaqada hadday sugnaato in wax qabadkiisu liito, wax lillitir ahna ma yeelan karo.

## QAYBTA V

## QODOBKA 24AAD

### WAAJIBAADKA

QOFKA SHAQAALAHA AHI WAA :-

1) Inuu waqtigiisa iyo wax qabadkiisaba ku jeediyaa siduu uga soo bixi lahaa waajibaadka iyo xilka jagadiisa ka saaran iyo hawlaha la xiriira ee madaxda hayadda u xil saartay.

2) Inuu ka shaqeeyo meesha uu u diro madaxa hay'addu

3) Inuu inta karaankiisa ah waxba ka hakran hawsha

loo xilsaaray isagoo u hogaansan qodobbada sharci-gaan, nidaamka la dejiyey iyo danta guud saameeya.

4) Inuu ixtiraamo xeerarka khuseeya shaqadiisa.

5) Inuu u aqoonsado inay sir yihiin wararka shaqada awgood ku soo gaara.

6) Inuusan ka daahin saacadda shaqada, waqtigana dhawro.

7) Inuu maqlo ixtiraamana madaxda ka sarraysa.

8) Inuu si xilkasnimo ku jirta u dhawro una xannaanee-yo hantida dawladda.

QODOBKA 25AAD

WAXYAABAHA KA REEBAN QOFKA SHAQAALAHA AH

1) Qofka shaqaalaha ah uma bannaana :-

b) Inuu ku kaco fal shaki gelin kara hufnaantiisa iyo inuu daacad u yahay dawladda iyo dalka.

t ) Innuu daabaco amaba suurta geliyo daabacaadda wax ku saabsan dawladda amaba ka soo jeediyo khudbad ama warbixin rasmi ah oo siyaasadda dawladda ama arrimo ku saabsan nabadgelyada dalka, haddaanay taasi ka mid ahayn hawshiisa caadiga ah ama aannu fasax uga haysan madaxa hay'addiisa.

j) Inuu isku mar wada qabto laba jago iyagoo aan si sharci ah loogu oggolaan.

x) Inuu weydiisto ama ka aqbalo deeq hayado ka baxsan kuwa ku shaqeeya caawinaadda insaanka amaba ka qayb galo lacagururin ujeeddo kasta ha lahaatee, hadduusan haysanin oggolaanshaha madaxa hay'addiisa.

kh) Inuu aqbalo hadiyad qiimo leh ama shahaado, hadduusan haysanin oggolaanshaha madaxa hayaddiisa.

d) Inuu sameeyo maal-gelin ama wax la mid ah oo ku

dhalin kara caatifo locgu soo gabban karo si looga faa-iidaysto, taasoo shaqadiisana wax yeelaynaysa.

R) Inuu galo ganacsi amaba ka qayb galo abuuritaanka horumarinta ama Maaraynta Banki ama Shirkad haddaanay taasi ka mid ahayn hawshiisa.

S) Inuu lacag deynsado ama qaan lacageed ka galo, qof shirkad ama banki uu xiriir shaqo la yeelan karo.

sh) Inuu arrimihiisa khaaska ah u maamulo si u keenta inuu caadiyan deynloow noqdo.

d) Inuu ku kaco ama ku dhaliyo qof kale faragelinta awoodda siyaasadeed ama mid kaleba oo isaga u faa'iidaysa ama liddi ku ah qof kaloo shaqaalaha ka mid ah awooddaas oo soo dhex gasha arrin isaga ama shaqaalaha kale khusaysa.

c) Inuu u soo gudbiyo arji ama ogeysiis madaxda hayadda isagoon soo marin waddada toosan ee rasmiga ah.

q) Inuusan ka tegin shaqadiisa isagoon oggolaansho hore ka haysan madaxdiisa.

2) Qofka shaqaalaha ahi waa inuusan xubin qoyskiisa ka mid ah u oggolaanin inuu falalka kor lagu tilmaamay ku kaco.

## QODOBKA 26AAD

## DHAAR

Qofkasta ee shaqaale dawladeed ah marka uu shaqada bilaabayo wuxuu marayaa dhaarta soo socota; isagoo lagu dhaarinayo madaxa hayadda hortiisa : «Waxa igu Wallaahi ah, Igu Billaahi ah, Igu Tallaahi ah in aan u hogaansanaado Dastuurka iyo Sharciyada Dalka, inaan hirgeliyo mabda'a Hantiwadaagga, anigoo hawsha lay xilsaaray u gudanaya sida sharcigu farayo, anigoo muujinaya dedaal, xilkasnimo iyo eex-la'aan, dhawrayana sirta dawladda, waxaana ku dedaali doonaa inaan dhawro nabadgelyada, sharafta iyo jiritaanka Qaranka».

## QODOBKA 27AAD

## MAGDHAWGA KHASAARAHA AY KEENAAN SHAQAALUHU

1) Qofka shaqaalaha ah; waa inuu magdhaw dawladda ka siiyaa wixii khasaara ah oo ka dhasha isagoo waajib gudan waayay, dhibaatooyinka ka dhasha ku xad gudubka qod. 24aad iyo 25aad ee Sharcigan.

2) Hadday dhacdo in falka ama wax qabasho la'aanta qofka shaqaalaha, ah ha u qasdiyo ama hawl yaraysasho ha ka ahaatee, ay dhibaato uga dhalato dhinacyo kale, qofkaasi shaqaalaha ah iyo hay'addiisa waxay wadar ahaan mas'uul uga yihiin magdhawga la siinayo dhinacyada dhibaatadu gaartay. Hadday hay'addu bixiso magdhawga, waxay markeeda xaq u yeelanaysaa inay magdhawgaasi u raacato qofka shaqaalaha ah ee dhibaatada u sabab ahaa.

## QODOBKA 28AAD

## AMARKA MADAXA OON SHARCI WAAFAQSANAYN

Marka qofka shaqaalaha ahi ka helo madaxa hay'adda amar aan sharciga waafaqsanayn, waxa laga doonayaa inuu ma daxa dareensiiyo sida ay la tahay isagoo caddaynaya asbaabaha uu amarka sharci darro ugu sheegayo. Haddii amarka la adkeeyo iyadoo qoraal ahaan loo siinayo, qofka shaqaalaha ahi waa inuu amarka fuliyo. Hadduu amarku cawaaqib xun yeesho, waxa mas'uul ka noqonaya madaxa amarka bixiyey.

## QODBKA 29AAD

## FALKA AAN SHARCIGAN WAAFAQSANAYNI WAA WAX KAMA JIRAAN

Haddaan si kale loogu tala gelin, fal kastoo uu shaqaaluhu ku kaco oon sharcigan waafaqsanayni waa wax kama jiraan, sidaas awgeedna ma dhalin karo xaq dawladda loo raacan karo.

Qofka Shaqaalaha ah ee falkaas ku kaco waxa laga qaadayaa tallaabo sharciya.

## QODOBKA 30AAD

### DEYN DAWLADDU KU LEEDAHAY SHAQAALE

Marka dawladdu qof shaqaale ah deyn ku leedahay, waxa lacagta lagu leeyahay laga goyn karaa mushaarkiisa, iyadoo bil walba laga goynayo wax aan ka badnayn afartii meelba hal meel mushaharkiisa bisha. Hadduuse qofku shaqada ka baxayo, sabab kastaba ha ku timaadee, lacagta lagu leeyahay oo dhan waxa laga goynayaa lacagta uu dawladda xaqa ugu leeyahay.

## QODOBKA 31AAD

### FASAXA TODDOBAADKA IYO CIIDAHA

1) Shaqaaluhu waxay xaq u leeyihiin toddobaadkiiba hal maalin oo nasasho ah, oo sida caadiga ah ku beegan maalinta jimcaha.

2) Shaqaaluhu waxa kale ay xaq u leeyihiin nasasho ah maalmaha ciidaha ay dawladdu aqoonsan tahay.

## QAYBTA VI

## FASAXA

## QODOBKA 32AAD

### FASAXA SANNADKA

1) Qofka Shaqaalaha ahi wuxuu xaq u leeyahay 30 casho oo fasax ah sannadkiiba iyadoo mushaharkiisuna u soconayo, fasaxa waxa caadiyan la siinayaa sannad-kasta oo uu shaqeeyey aakhirkiisa.

2) Madaxda hay'addu waa inay qorsheeyaan habkii fasaxa loo bixin lahaa, iyagoo tixgelinaya danta shaqada iyo shaqaalahaba.

3) Hase yeeshee, haddii dawladdu dan qaran awgeed u joojiso fasaxa waxa la kaydin karaa ilaa 3 sano.

## QODOBKA 33AAD

### FASAXA LACAG LA'AANTA AH

Qofka shaqaalaha ah waxa la siin karaa fasax lacag la'aan ah oo gaari kara ilaa 4 bilood, saddexdii sano gudahooda. Fasaxa lacag la'aaneed waxa oggolaan karta Wasaaradda Shaqada iyo Arrimha Bulshada, marka ay warbixin ka hesho hayadda qofku ka tirsan yahay.

## QODOBKA 34AAD

### FASAXA DHALMADA

1) Haweenta shaqaalaha ahi waxay xaq u leedahay ka sokow fasaxyada lagu tilmaamay qodobbada 31, 32, 33, 35, iyo 36 fasax dhalmo oo gaaraya 4 bilood oo mushahar leh, shardina waxa ah in haweentu keento caddayn Takhtar dawladeed 2 bilood waxay qaadanaysaa dhalmada ka hor, labada kalena dhalmada ka bacdi.

2) Haweeneyda shaqaalaha ahi fasax caadi ah ma laha sannadka ay qaadato fasaxa dhalmada.

## QODOBKA 35AAD

### FASAXA BUKAANKA

1) Fasaxa bukaanka waxa oggolaanaya Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, ka dib marka ay hesho caddayn Guddi Takhaatiir Dawladeed.

2) Waxa qofka la siinayaa mushahar buuxa lixda bilood ee hore ee fasaxa bukaanka, wixii lix bilood ka badansa mushahar bar ah, laakiinse mushaharka waxba laga dhimi maayo ilaa inta uu ka dhammaanayo fasaxa bukaanka haddii jirada ama dhaawaca ay u sabab tahay shaqadii uu hayey.

)3 Shaqaalaha lama siin karo sannadkiiba wax ka badan toban casho oo fasax jirro fudud ah oo uu soo caddeeyey takhtar. Wixii toban casho ka badan waxa laga goynayaa fasaxa sannadeedka caadiga ah ee qofka.

QODOBKA 36AAD

FASAXA WAXBARASHADA

Marka dawladdu garato in qof shaqaale ah la siiyo fasax waxbarasho ama tababar dalka dibaddiisa ah, waxa Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare ay gooynaysaa muddada ay qaadanayso waxbarashada ama tababarka, iyadoo hay'adda qofku ka tirsan yahay kala tashanaysa dhinaca tababarka.

Muddada la gartay in tababarka ama waxbarashadu qaadanayso, qofku mushahar ma laha, waxaase qoyskiisa la siinayaa deeq u dhiganta mushaharkiisa caadiga ah oo dhan.

QODOBKA 37AAD

DIB ULA NOQOSHADA FASAXA

Madaxda Hay'addu, haddii shaqo awgeed loogu baahdo, wuxuu dib ugu yeeri karaa shaqaalaha ku jira fasaxyada ku xusan qodobada 32, 33, iyo 36, Shaqaalaha loo yeeray waxa ku waajib ah inuu waqtiga loo qabtay xafiiska ku yimaado, haddii aanay sabab la garowsan karaa jirin.

QAYBTA VII

DALACAAD, DARAJO DHIMID, ERGIN IYO BEDDELAAD

QODOBKA 38AAD

DALLACAADDA

1) Dallacaadi waa u gudbinta qofka shaqaalaha ah loo gudbinayo heer ama darajo ka sarraysa tii uu joogay.

2) Dallacaad lama samayn karo haddaan jagada qofka loo dallacsiinayaa ayan bannaanayn.

3) Qofka shaqaalaha ah waxa dallacaad loo tixgelin karaa marka uu ku sugnaado darajo muddo ku siman saddex sano.

4) Halkii sano ee tababar shaqada qofku hayo la xiriirta, waxa loo aqoonsanayaa laba sano oo shaqo ah.

5) Qofka lama dallacin karo hal darajo wax ka badan markiiba, haddii qofka lagu magacaabo jago ka sarraysa darajadiisa, wuxuu ku mushahar qaadanayaa darajada uu yahay, isagoo xaq u yeelanaya wixii gunnooyin ah ee jagada lagu magacaabay leedahay.

## QODOBKA 39AAD

## GUDDIGA DALLACAADDA, ABAALMARINTA IYO ANSHAXA EE HAY'ADDA

1) Hay'ad kastaa waxay yeelan doontaa guddi u xilsaaran dallacaadda, abaal-marin iyo anshaxa shaqaalaha hay'adda oo ka kooban xubnaha soo socda.

1) Agaasimaha Guud — Guddoomiye

2) Agaasimayaasha — Xubin

3) Saddex Guddiga Shaqaalaha ka mid ah oo kala ah Guddoomiyaha, Xoghayaha iyo Xoghayana Danaha Shaqaalaha — Xubin

4) 2 qof oo ka kala socda Ururka Haweenka iyo Dhallinyarada, — Xubin

2) Marka Hay'adi u soo jeediso dallacaad qof Shaqaale ah, waxa la hor dhigayaa Guddiga Dallacaadda, Abaalmarinta iyo Anshaxa ee hayadda, Guddigu markuu si qota dheer arrinta u baaro tixgeliyana warbixinta sannadka iyo taariikh nololeedka qofka iyo shuruudaha kor ku qoran wuxuu taladiisa u gudbinayaa Wasiirka hay'adda.

3) Wasiirku marka uu arko talada guddiga, tixgelinta ay mudan tahayna siiyo, haddii u garowsado talada guddiga, wuxuu soo jeedinta u gudbinayaa Madaxtooyada isagoo sii marinaya Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada.

4) Go'aan ka gaarista warbixinada loo soo jeediyo ka sokow, Madaxweynaha JDS wuxuu awood u leeyahay inuu toos u amro in la dallacsiiyo ama la magacaabo qof shaqaale ah, markay u caddaato inuu mutaystay.

## QODOBKA 40AAD

## ANSIXIDDA DALLACAADA

1) Dallacaadda Shaqaalaha loo dallacsiinayo heerarka «A», «AY» «F» iyo «B» waxay ku ansaxayaan xeer Madaxweyne.

2) Dallacaadda Shaqaalaha ah heerarka «X», «C», iyo «D», waxay ku ansaxayaan xeerka Wasiirka Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada.

## QODOBKA 41AAD

## DARAJO DHIMID

1) Darajo dhimidi waa ka wareeyin shaqaale laga wareejinayo heer sare loona wareejinayo mid hoose. Shaqaalaha darajadiisa hoos looma dhigi karo haddii aan anshax la marin.

2) Darajo dhimidda shaqaalaha heerkoodu yahay sida kuwa ku kala tilmaaman xubinta 1aad iyo tan 2aad ee qodobka 40aad, waxa lagu kala ansixinayaa hadba sida uu kala yahay heerkoodu.

## QODOBKA 42AAD

## ERGIN SHAQAALE

1) Ergintu waa wareejin ku meel gaar ah oo shaqaale lagu wareejinayo :-

b) Hay'ad Dawladeed

t) Dawladda Hoose

j) Hay'ad Dawladdu qayb ku leedahay

x) Dawlad kale

kh) Hay'ad Caalami ah

2) Hawsha Shaqaalaha erginta ku maqan waxa loo xisaabayaa hawl dawladeed.

## QODOBKA 43AAD

## DEDDEL

1) Beddelaaddu waa wareejinta shaqaale laga wareejinayo hay'ad loona wareejinayo hay'ad kale.

2) Qofka shaqaalaha ah waxa hay'addiisa laga beddeli karaa :-

b) Hadduu dheeraad ku yahay;

t) Hadduu hay'ad kale ku waxtar roon yahay iyadoo xirfadiisa la tixgelinayo;

j) Hadday maslaxadda qaranku ku jirto;

3) Beddelaadu shaqaalaha mushaharkiisa waxna ku kordhin mayso, waxna ka dhimi mayso. Hase yeeshee, haday noqoto lagama maarmaan in mushaharadiisa wax ka dhinmaan, waa in Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshadu dib u qiimaysaa iyadoo tixgelinaysa, tacliintiisa, aqoontiisa guud iyo waayo aragnimadiisa.

4) Beddelka qofka shaqaalaha ahi wuxuu hirgeli karaa marka ay isla oggolaadaan madaxa hay'ada qofka laga beddelayo iyo Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada.

5) Hase yeeshee Madaxweynaha J. D. S. wuxuu awood u leeyahay inuu amro in qof shaqaale ah hay'ad laga beddelo oo mid kale loo beddelo.

6) Beddelka shaqaalaha heerkoodu yahay sida kuwa ku tilmaaman xubinta 1aad iyo tan 2aad ee qod. 40aad, waxa lagu kala ansaxinayaa hadba sida uu kala yahay heerkoodu.

### QODOBKA 44AAD

### KALA MUDNAANTA SHAQAALAHA ISKU DARAJADA AH

Kala mudnaanta shaqaalaha isku darajada, ah, waxa loo fiirinayaa kala mudnaashahooda sida ay shaqada ama darajada ugu soc kala horreeyeen.

## QAYBTA VIII

## ANSHAXA

### QODOBKA 45AAD

### DEMBIYADDA IYO CIQAABAHA

1) Ciqaabaha anshaxeed ee lagu qaadi karo shaqaalaha waxay noqon karaan :-

b) Canaan qoran;

t) Ganaax aan ka badnayn mushaharkiisa 7 casho;

j) Mushaharkiisa oo muddo aan bil ka badnayn laga gooyo, iyadoo loo raacayo habka ku qoran Qodobka 30aad;

x) Shaqo iyo mushahar ka joojin aan ka badnayn 3 bilood, muddadaasoo aan loogu xisaabi doonin hawlgabka iyo liiltirka;

kh) Ka daahin dallacaad;

d) Mushahar ka dhimid gaari karta saddexdii meelba meel muddo aan ka badnayn 6 bilood;

r) Hoos u dhigid darajo;

s) Shaqo ka saarid;

2) Ciqaabaha lagu sheegay xarfaha (b) ilaa (j) ee xub-inta hore ee qodobkan, waxa lagu mutaysan karayaa dembiyada kala ah :

b) Shaqo dayicid weyn ama hawl qabasho naaqusta;

t) Amar diiddo loo qasday;

j) Ku xad-gudub qoddobada 24 iyo 25 ee Sharcigan;

x) Dhaqan xumo keenta shaqo joogsata ama qas gala shaqada;

kh Shaqo ka maqnaan cudur daar la'aan;

d) U dul qaadasho shaqaalaha hoose oo ku xad gudba nidaamka shaqada;

3) Ciqaabaha lagu sheegay xarfaha (x) ilaa (s) ee xub-naha hore ee qodobkan waxa lagu mutaysan karaa dembiyada kala ah :-

b) ku xad gudub weyn oo awoodeed;

t) Ku xad gudub culus ee waajibaad xafiis oo dhib u soo jiida hay'ad Dawladeed ama dad gaar ah;

j) Ku takri fal ama xatooyo xoolo dadweyne oo qofka shaqaalaha ah lagu aaminey;

x) Weydiisasho ama aqbalid laaluush lagu qaato hawl rasmi ah oo la qabtay ama la qaban doono;

kh) Amar diido weyn;

d) Ku xad gudub sirta dawladda;

r) Ka faa'iidaysi awoodda jagada si dan shakhsi ah loo gaaro;

4) Ciqaabaha dembiyada kor lagu soo sheegay waa la kordhin karaa ama waa la dhimi karaa marka ay ji-raan duruufo wax ku kordhinaya ama fududaynaya dembiga.

## QODOBKA 46AAD
## QAADIDDA TALAABOOYINKA ANSHAXA

1) Madaxweynaha J. D. S. ama cidda uu wakiisho wuxuu awood u leeyahay inuu :-

b) Ciqaabaha anshaxa ee ku xusan xubinta 1aad ee qod 45 ku qaado shaqaalaha Madaxtooyada J. D. S. isagoo dhegaystey talada Guddiga D. A. iyo Anshaxa ee Madaxtooyada.

t) Ciqaabaha anshaxeed ee ku xusan xarfaha «J» ilaa (s) ee xubinta 1aad ee Qodob. 45aad ku qaado Agaasimayaasha Guud iyo Shaqaalaha la mid ah ee Hay'adaha Dawladda isagoo dhegaystey talada Guddi heer sare ah oo isagu magacaabay;

j) Ciqaabaha anshaxeed ee ku xusan xarfaha x, r, iyo s, ee Xubinta 1aad ee qod. 45aad ee sharcigan ku qaado shaqaalaha hay'adaha marka uu dhegaysto talada Wasiirka hay'adda;

2) Wasiirka Hay'adda wuxuu awood u leeyahay inuu :-

b) Ciqaabaha anshaxeed ee ku xusan xarfaha j, kh iyo d ee xubinta 1aad ee Qod. 45aad ee sharcigan ku qaado shaqaalaha hay'ada isagoo dhegaystey talada Guddiga D. A. iyo An ee Hay'ada;

t) Ciqaabaha anshaxeed ee ku xusan xarfaha b iyo t ee xubinta 1aad ee Qod. 45aad ee sharcigan ku qaado Agaasimaha Guud iyo shaqaalaha la midka ah ee Hay'adaha hoos yimaada;

j) Uga jeediyo ra'yigiisa Madaxweynaha, ciqaabaha anshaxeed ee ku xusan xarfaha x, r iyo s ee shaqaalaha hay'adiisa marka uu dhegaysto garowsadana talada guddiga D. A. iyo An. ee Hay'adda.

3) Agaasimaha Guud ee Hay'ada Dawladdu wuxuu awood u leeyahay inuu ciqaabaha anshaxeed ee ku xusan xarfaha (b) iyo (t) ee xubinta 1aad ee Qod. 45aad ee sharcigan ku qaado shaqaalaha hay'adiisa marka uu dhegaysto talada Agaasimaha Waaxda qofku ka tirsanyahay.

4) Guddiga D. A. iyo An. ee Goboladu wuxuu ka kooban yahay.

b) Xoghayaha Gobolka — Guddoomiye;

t) Kaaliyaha 2aad Xog. Gobolka — Xoghaye;

j) Wakiil ka tirsan NSSta; — Xubin

x) Wakiil ka tirsan Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada meesha uu jooginna Xoghayaha Degmadda — Xubin

kh) Wakiil ka socda X. G. U. Shaq. ee Gobolka, — Xubin

5) Guddiga D. A. iyo An. ee Gobollada wuxuu dhinaca anshaxa shaqaalaha dawladda awood u leeyahay inuu:

b) Ciqaabaha anshaxeed ee ku xusan xarfaha (b) iyo (t) ee xubinta 1aad ee Qodobka 45aad ee sharcigan ku qaado shaqaalaha Gobolkooda ka tirsan.

t) U gudbiyo Wasiirka hay'adda ciqaabaha anshaxeed ee ku xusan xarfaha (j) ilaa (s) ee xubinta 1aad ee Qod. 45aad ee sharcigan.

j) Dembiyada anshaxeed ee ka dhaca degmooyinka magaala Madaxda Gobolka ka baxsan, waxay u Wakiilan karaan guddi hoosaadyo degmooyinka ka tirsan oo talo guddiga uga soo jeediya;

6) Wasiirku markuu ka fiirsado talada Guddiga Gobolka garowsadana waa inuu ka qaadaa tallaabooyinka ku xusan xarfaha (b) iyo (j) ee xubinta 2aad ee qodobkan.

7) Ciqaabaha anshaxeed ee ku xusan xarfaha X, R, S ee xubinta 1aad ee Qod. 45aad ee sharcigan waxa lagu hirgelinayaa Xeerka Madaxweynaha JDS, ama xeerka Wasiirka Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada hadba sida heerka shaqaalaha uu kala yahay.

## QODOBKA 47AAD

### HABKA QAADISTA DACWADAHA ASLUUBTA

1) Dacwad kastoo anshaxeed waa in loo gudbiyaa Guddiga qaadisteeda awoodda u leh, iyadoo qoran muddo bil ah gudaheed, laga bilaabo maalinta dembigu dhacay, haddii kale wax ka soo qaad ma leh.

2) Guddigu wuxuu qoraal ku ogaysiinayaa dacweysanaha taariikhda dacwada la galayo, isagoo gaarsiinaya nuqul dacwada loo haysto ugu yaraan 24 saac ka hor intaan dooddu furmin. Nuqulkaas waa inuu ka muuqan karo fikrad ku filan qofka waxa lagu soo eedeeyey.

3) Guddigu waa inuu :

b) Qaadaa wixii caddayn ah oo eedeynta taageeraya ka dibna waa inuu qaadaa wixii caddayn ah oo uu la yimaado qofka dacwada loo haysto kaasoo xaq u leh goob joog inuu ahaado marka dacwada iyo caddayntaba la qaadayo, si buuxdana isku daafaco.

t) Hadal qoraalka Guddigu waa inuu koobaa wixii caddeyn ah oo la qaaday iyo sidii dooddu u dhacday.

j) Go'aanka Guddigu waa inuu qoraal noqdaa, waana inay saxeexaan dhammaan xubnaha Guddigu.

x) Guddiga Anshaxu waa inuu galaa dacwada la hor keenay muddo 15 maalmood gudahood ah si dhaqso lehna u dhammeeyaan.

kh) Go'aanka ka soo baxa Guddiga Anshaxa waa in nuqul laga siiyaa qofka arrintu khusayso, galkiisana nuqul la geliyaa nuqul kalena loo diro Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada.

## QODOBKA 48AAD

## SHAQO KA JOOJIN

1) Madaxa Hay'adda hadduu u arko dan guud, wuxuu shaqada iyo mushaharka ka joojin karaa shaqaalaha lagu soo eedeeyey ciqaab anshaxeed ama mid dembiyeed.

2) Madaxa Hay'adduu wuxuu kaloo qofka dembiga ama anshaxa lagu soo eedeeyey shaqada ama mushaharka ka joojin karaa :-

b). Haddii maxkamadi waaran (Mandato di Cattura) u goysay.

t ) Haddii ay caddaato in qofku dambiga lagu eedeeyey uu ku noqnoqanayo ama la imanayo dhibaatooyin kale oo Qaranka waxa yeelo u leh.

3) Muddada shaqo ka joojintu socoto, qofka mushahar lama siin karo, hase yeeshee waxa qoyskiisa la siin karaa wax aan ka badnayn nus mushaharkiisa caadiga ah.

### QODOBKA 49AAD

### JOOJIN DACDO ANSHAXEED ILAA LAGA DHAMAAYNAYO DACDO CIQAABEED

Haddii dacwad ciqaabeed oo liddi ku ah qof shaqaale ah ay Maxkamad ka socoto, isla dembigaas dacwad anshaxeed lagama furi karo ilaa dacwadu Maxkamada ka soo dhammaato.

Haddii dacwadda anshaxeed mar hore la bilaabay waa la joojinayaa ilaa laga hubsado siday ku dhammaanayso dacwadda ciqaabeed.

### QODOBKA 50AAD

### KU QAADID DACWO ANSHAXEED SHAQAALAHA LAGU WAAYO DEMBI CIQAABEED

Inkastoo Shaqaalaha si kama dembays ah denbi ciqaab ah loogu waayo, waxa haddana lagu qaadi karaa dacwad anshaxeed haddii dacwada ciqaabta intay socotey laga war helay waxyaabo waajib ka dhigayo in talaabo anshax ah laga qaado.

## QOYBTA IX

## DHAMAADKA XIRIIRKA SHAQADA

### QODOBKA 51AAD

### SHAQO KA TEGIS

1) Qofka shaqaalaha ahi wuxuu dalban karaa shaqo ka tegis, isagoo madaxda hay'adda arji hor dhigaya. Arjiga waa la noqon karaa qofku intaan la siin jawaab lagu aqbalayo dalabkiisa.

2) Madaxa hay'adda, isagoo dhegaystey talada Guddiga dallacaadda, abaalmarinta iyo anshaxa, waa diidi karaa istiqaaladda dan guud awgeed, hadday caddaato inaan qofka shaqadiisa laga maarmayn.

3) Qofka shaqaalaha ah ee markii istiqaaladiisii la diiday shaqada ka taga waxa lagu qaadayaa dacwad ay ku shaqo leedahay Maxkamadda Badbaadadda dalka wuxuuna mutaysan karaa xarig ilaa iyo sannad ah iyo ganaax gaaraya Shs. 3000 waxana laga mamnuuci karaa inuu xirfadda uu yaqaan ku shaqaysto muddo 5 sano ah.

4) Shaqo ka tegista shaqaalaha heerkoodu kala yahay sida kuwa tilmaaman xubinta 1aad iyo tan 2aad ee qod. 40aad, waxaa lagu kala ansaxinayaa hadba sida ku tilmaaman isla qod. 40aad.

## QODOBKA 52AAD

## SHAQO KU CELIN

1) Shaqaalaha ku sugnaada xaaladaha ku tilmaaman xarafyada B, T iyo J ee qodobkan, waxa lagu celin karaa shaqaday hay'adda ka hayn jireen haddii :-

i ) Shaqadooda loo baahan yahay,

ii) Jago ku habbooni bannaantahay

iii) muddaday shaqada horay u hayn jireen muujiyeen dedaal, karti iyo daacadnimo, iyadoo laga shidaal qaadanayo qof kasta galkiisa.

iv) shuruudaha mid kasta u gaarka ahi ay u dhan yihiin, kuwaasoo ah :

B) Qofka shaqaalaha ah ee lagu xiray denbi aan xiriir la lahayn shaqada dawladda :

j ) hadd uuqorniin kaga codsado hayaddii uu ka tirsanaa jirey shaqo ku celin muddo laba bilood gudahood ah marka laga bilaabo taariikhda xabsiga laga sii daayey;

ii ) haddii xukunka lagu qaaday aanu keenaynin shaqo ka reebid-interdictions sida ku tilmaaman xarafka «T» ee Qodobka 56aad ee sharcigan.

T) Sida ku cad qodobka 54aad ee sharcigan, qofka shaqada markii hore looga fariisiyey caafimaad xumo awgeed :

i ) haddii Guddi takhaatiir dawladeed oo Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada u dirtay soo caddeeyey in caafimaadkiisii wanaagsanaadey oo gaarey heer uu hawshiisa si caadi ah u gudan karayo,

ii ) Hadduu qorniin ku soo codsado shaqo ku celin muddo laba sano gudahood ah marka laga bilaabo taariikhdii shaqada laga fariisiyey

J) Sida ku cad qodobka 51aad ee sharcigan, qofka shaqo ka tegis si sharciya markii hore looga oggolaaday oo hal sano gudaheed shaqo ku celin soo codsada, marka laga bilaabo taariikhdii shaqo ka tegista laga oggolaaday.

2) Awoodda go'aan ka gaarista codsiga shaqo ku celinta waxa yeelanaya Guddiga D. A. iyo Anshaxa Hay'adda, waxana lagu ansaxinayaa xeer Madaxweyne ama Xeerka Wasiirka Wasaaradda Shaqada & Arrimaha Bulshada, iyadoo la raacayo qodobka 40aad ee Sharcigan.

3) Qofka shaqada lagu celiyaa wuxuu xaq u yeelan karaa mushahar marka uu rasmi ahaan shaqada u bilaabo.

4) Shaqaalaha ku xusan xarafka «B» ee qodobkan ee shaqo ku celinta loo oggolaado muddaday shaqada ka maqnaayeen waxa loo xisaabinayaa fasax lacag la'aan iyo xaq la'aan ah.

QODOBKA 53AAD

SHAQO *KA* FA*DH*IISA*D* *DA'*AWGEE*D*

1) Qofka shaqaalaha ahi wuxuu shaqada ka fadhiisanayaa :

b) Marka uu gaaro 60 sano hadduu nin yahay;

t) Markay gaarto 55 sano haddii ay haween tahay;

2) Mararka qaarkood qofka shaqaalaha ah waxa loo oggolaan karaa inuu shaqada ka fadhiisto ka hor intuusan gaarin da'da kor ku sheegan iyadoo la tixgelinayo hadday jiraan duruufo gaar ahaaneed.

QOOBKA 54AAD

SHAQO KA FADHIISIN CAAFIMAAD DARTIIS

Shaqaalaha la garto, marka uu soo maro baaritaanka Guddiga Caafimaadka ee Dawladda inuusan shaqayn karayn caafimaad darro awgeed, shaqada waa laga fadhiisin karaa isagoo la siinayo wuxuu xaq u yeesho iyadoo sharcigan la raacayo.

QODOBKA 55AAD

SHAQO KA FADHIISIN DAN GUUD AWGEED

1) Qof kastoo shaqaale ah shaqada waa laga fadhiisin karaa dan guud awgeed.
2) Shaqo ka fadhiisinta waxa lagu soo saarayaa xeerka Madaxweynaha J. D. S. Qofka shaqada laga fadhiisiyeyna waxa la siinayaa xuquuqdii u bislaatay.

QODOBKA 56AAD

SHAQO KA *S*AARI*D* *SA*BA*B* ANSHA*X*EE*D* : XU*K*UN MAX-KAMADEED AMA SHAQA KA MAQNAASHO MUDDO DHEER

CUDUR DAAR LA'AAN

1) Qofka shaqaalaha ah waxa shaqada looga saari karaa sabaha soo socda ;-

b) Ciqaab anshaxeed oo uu ku qaaday Guddi anshax;

t ) Xukun Maxkamadeed oo kama dambays ah oo ku saabsan ku isticmaalka xafiiska si loo helo macaash sharci darro ah, ama xatooyo xoolo dadweyne, khiyaano, tuugo, dhac ama dembi kaloo qofka ka reebaya inuu qabto shaqo dawladeed inkastoo la cafiyo;

j ) Markuu shaqada ka maqnaado muddo lix bilood gaaraysa cudur daar la garawsan karo la'aan. Maqnaashada qofku markuu 6 bilood ka yar yahay waxaa lagu qaadi karaa ciqaab anshaxeed.

2) Shaqaalaha shaqa ka saariddiisa qodobkan loo cuskado xaq uma laha fasaxa caadiga ah ee sannadka ugu dambeeya maadaama aannu u bislaanin fasax.

QODOBKA 57AAD

SHAQO KA SAARID XAQ LA'AAN

1) Dembiyada kale ee sharcigan ku xusan ka sokow, qofka shaqaalaha ah waxa shaqada qaranka lagaga saari karaa xaq la'aan hadday guddiga dallacaadda, abaalmarinta iyo anshaxa ee hay'ada hortiisa kaga caddaadaan cilladahani :-

Hakrasho, googooyin iyo curyaamin shaqada dawladda isagoo tusaale xun u muujinaya shaqaalaha hantiwadaaga ah si uu danihiisa gaarka ah u fushado.

2) Sugnaashaha jiritaanka cilladaha lagu sheegay xubinta 1aad ee qodobkan waxa caddayntiisa loo xil saaray Guddiga shaqaalaha iyo maamulka hay'adda oo wada jira.

QAYBTA X

QAYBTA FARSAMO YAQAANKA

QODOBKA 58AAD

MACNAYNTA EREYADA QAYBTA FARSAMA YAQAANNADA

Marka qaybta Farsama Yaqaannada ee sharcigan laga hadlayo, erayada hoos ku qoran waxa loo fasirayaa sida eray kasta hortiisa ku qoran :-

1) Shaqo (Occupation) waa hawl qofka awood u siin karta inuu barto kana shaqeeyo gacanta ama maskaxda;

2) Farsamo (Trade-Craft) waa hawl xirfadeed, una baahan in shahaado ama aqoonsi lagu kasbo, loona yeesho waayo-aragnimo, dhinaca xirfadda gacanta iyo tiyooriyadana la xiriirta;

3) Farsamo barad (Apprentice) waa qof ku jira tababar si loo gaarsiiyo heer kaaliye xirfadle, ama xirfadle aan ka mid ahayn hay'addaha dawladda;

4) Kaaliye Xirfale- waa qofka shaqaalaha caadiga ahna ka xeel dheer, waayoaragnimada iyo aqoontiisuna gaarsiisnayn heer xirfadle;

5) Xirfadle (3aad) waa qofka waayo aragnimo, ama layllis ku kasbay xirfad gacmeed, kana gudbay imtixaanka qiimaynta ee heerka saddexaad;

6) Xirfadle dhexe (2aad) waa qofka awood u leh cillad helid iyo bixin, iyo beddelid xubin qalab farsamo gudbeyna imtixaanka qiimaynta xirfadda ee heerka labaad;

7) Xirfadle sare (1aad) waa qofka awood u leh cillad helid iyo bixin; garan karana sababtii cillada keentay kuna darsaday teoriyaddii loo baahnaa, gudbeyna imtixaanka qiimaynta xirfadda heerka Koowaad;

8) Farsamayaqaan (3aad) waa qofka haysta shahaadadda dugsiga sare ee Farsamada, ama shahaado u dhiganta;

9) Farsama yaqaan dhexe (2aad) waa qofka marka uu dhameeyey Dugsiga Sare ee Farsamada qaatay :

b) Ugu yaraan 2 sano oo tababar oo la xiriirta cilmiga shaqadiisa ama,

t) Ugu yaraan sannad tababar farsamo oo la xiriirta cilmiga shaqadiisa kuna shaqeeyey farsamadaas ugu yaraan laba sano tababarka ka baxsan.

10) Farsamayaqaan sare (1aad) waa qofka, isagoo haysta shahaadada dugsiga sare ee farsamada, qaatay ugu yaraan laba sano oo tababar farsamo la aqoonsanyahay kuna shaqeeyey farsamadaas ugu yaraan saddex sano tababarka ka bacdi.

11) Aqoonyahan (Jaamici Professional) waa qofka haysta shahaado Jaamici ah oo farsamo;

12) Qaybta farsamo-yaqaannada waxa loola jeedaa qaybta sharcigan ee lagu maamulayo farsama baradka; kaaliye xirfadle, xirfadle, farsamayaqaannada iyo aqoonyahannada.

Erayga farsama-yaqaannada-waxa guud ahaan loo isticmaalayaa arrimaha qaybta sharcigani saamaynayo oo dhan, iyo farsamo-yaqaanada F. 3, F. 2 & F. 1 marka si gaar ah loo tilmaamayo.

QODOBKA 59AAD

MAAMULKA FARSAMAYAASHA

Shaqaalaha farsamayaqaanka ah waxa loo dejiyay qaybta sharcigan oo u gaarka ah oo lagu maamulo darajooyinkooda, jagooyinkooda iyo mushaarkoodaba, sida ku cad lifaaqa 2aad ee sharcigan.

QODOBKA 60AAD

MAAMULKA FARSAMAYAQAANKA

1) Darajooyinka farsamayaqaannada waxay u kala qaybsan yihiin sida soo socota:

b) Aqoonyahan
t) Farsamayaqaan
j) Xirfadle
x) Kaaliye xirfadle
kh) Farsama barad

2) Jago kastaa waxay leedahay darajooyin kala duwan, mushaharro bilow ah iyo mid ay ku dhammaato.

3) Qof kasta oo ka mid ah shaqaalaha Farsamayaqaannada, ayadoo loo tixgelinaayo heerka imtixaanka uu gudbey ama shahaadada farsamada ee uu sito, ayaa lagu meelayn doonaa darajada ku habboon ee ku xusan lifaaqa 2aad ee sharcigan.

## QODOBKA 61AAD

## DALLACAAD

1) Farsamo-yaqaannadu waxay xaq u leeyihiin dallacaad darajo;

2) Dallacaadda darajada waxa lagu mutaysan karaa :-

b) Imtixaan uu qofku ku guulaystay;

t) Marka qofku la yimaado shahaado ka sarraysa tii hore uu u sitey (Combiamento di categoria).

3) Qofkii muujiyey karti, daacadnimo iyo hawl karnimo dheeraad ah, qayb weyna si muuqata uga qaatay horumarka dalka, waxa la siin karaa dallacaad gaar ah (special merit),

4) Qofka farsamo yaqaanka ah darajada uu joogo lagama dallacsiin karo haddii uusan la iman shuruudaha ku cad qodobkan. Qodobkan erayada: «Farsamo yaqaannadu» iyo «Farsamo Yaqaanka» waxa loola jeedaa shaqaalaha qaybta sharcigani saamaynayo oo dhan.

## QODOBKA 62AAD

## IMTIXAAN

1) Qof kasta oo ka mid ah shaqaalaha xirfadlaha ah labadii sannaba marbaa imtixaan laga qaadi karaa, si loo qiimeeyo heerka aqoontiisa.

2) Qofkii imtixaanka ku guulaysta hal darajo ayaa sare loo qaadi karaa.

3) Qofka imtixaanka galaya, waxa shardi ah in ay madaxdiisu labada sano ee imtixaanka ka horraysa u gartaan in qofkaasi uu istaahilo in imtixaan laga qaado, iyadoo la tixgelinayo sida uu u guto waajibaadkiisa, asluubtiisa iyo hawlkarnimadiisa.

## QODOBKA 63AAD

### HEERKA AQOONTA XIRFADLAHA

1) Qofka xirfadlaha ah ee doonaya inuu u gudbo farsayaqaan, waa inuu farsamada uu u go'doomay u yaqaan teori ahaan iyo baraatika ahaan, isticmaali karaana kutubta iyo naqshadaha Farsamadaas la xiriirta.

2) Xirfadlaha waa inuu ugu yaraan laba sano ku shaqeeyaa darajada koowaad ee xirfadlaha, Imtixaanka farsamadana ku guuleystaa, inta uusan u gudbin darajada ka sarraysa midda uu joogo.

3) Xirfadlaha koowaad (ama sare) ee u dallaca farsamayaqaan, lacagtii uu ku qaadan jirey darajada xirfadlaha waxba ka go'i maayaan, hase yeeshee jago ahaan wuxuu gelayaa heerka farsamada ee uu imtixaankeeda ku guulaystey.

4) Xirfadlaha darajada koowaad jooga ee aqoon iyo waayo aragnimo dheer leh, si joogta ahna looga soo qoray warbixin wanaagsan, kana gudbi waayey imtixaankii uu farsamayaqaanka ugu gudbi lahaa, hawshana aan looga maarmin, 3 sanaba marbaa heerka mushaharkiisa kor loo qaadi karaa ilaa laga gaarsiinayo heerka ugu sarreeya ee xirfadlaha.

## QODOBKA 64AAD

### FARSAMAYAQAAN SARE EE U GUDBAYA AQOONYAHAN

1) Farsamayaqaanka sare ee u gudbaya aqoonyahan, lacagtii uu ku qaadan jirey jagada Farsamayaqaannimada waxba ka go'i maayaan hase yeeshee, jago ahaan wuxuu gelayaa jagada ugu hoosaysa ee aqoonyahanka.

2) Farsamayaqaanka sare ee aqoon iyo waayo aragnimo dheer leh, si joogta ahna looga soo qoray warbixin wanaagsan, kana gudbi waayey imtixaankii uu ugu gudbi lahaa aqoonyahan hawshana aan looga maarmin 3 sanaba marbaa mushaharkiisa kor loo qaadi karaa ilaa laga gaarsiinayo heerka ugu sarreeya ee farsamaqaanka.

## QODOBKA 65AAD

## AQOONYAHANNADA

Aqoonyahannada Jaamiciga ah musharkooda bilowga ah waxa loo kala sarraysiin karaa hadba sida shahaadadooda iyo aqoontoodda waayo argnimo u kala sarrayso.

## QODOBKA 66AAD

## SHAHAADDADA DUGSIGA DHEXE

Qofka isagoo haysta shahaadada Dugsiga Dhexe qaatay tababar gaar ah ee farsamo ugu yaraan labo sano, wuxuu la mid yahay farsamayaqaanka F. 3.

## QODOBKA 67AAD

## SHAHAADADDA DUGSIGA SARE EE CAADIGA AH

Qofka isagoo haysta shahaadada dugsiga sare ee caadiga ah, qaatay tababar gaar ah ee farsamo yaqaan hal sano, ama ka gudbay imtixaanka farsama yaqaanka wuxuu noqonayaa farsamo-yaqaanka F. 3.

## QODOBKA 68AAD

## QORITAANKA FARSAMABARKA

1) Xirfad kasta ama farsamo kasta waxay lahaan kartaa ama loo qori karaa shaqaale farsama barad ah oo tabar ku qaata xirfadda.

2) Marka tababarka loo qaadanayo qoritaanka farsamo baradka waxa loo raacayaa habka shaqo qorida ee shaqaalaha aan aqoon gaar ah looga baahanayn.

3) Haddii ay Miisaaniyaddu ogoshahay hay'addaha dawladda waxay qof kasta oo farsmo barad ah siinayaan gunno gaaraysa 120 shilin bishii.

4) Qofka farsamo baradka ahi wuxuu xagga badbaadada shaqaalaha kala mid yahay qofka uu xirfadda ka baranayo.

5) Marka tababarku u dhammaado, haddii hay'adda ay farsamada ka bartaan ama hay'ad kale ee dawladeed shaqada Farsama baradka u baahato waxaa laga qaadi karaa imtixaan u gaar ah kooxda ama kooxaha farsamo baradka ah ee shaqadooda loo baahan yahay.

## QODOBKA 69AAD

## GUDDIGA QARANKA EE FARSAMADA

1) Si qaybta farsama yaqaanka ee sharcigan si habsami ah loogu hirgeliyo waxa la dhisay guddiga qaranka ee farsamada oo ka kooban Wasiiradda Wasaaraddaha soo socda :

b) Wasaaradda Gaashaandhigga,

t) Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada,

j) Wasaaradda Warshadaha

x) Wasaaradda Gaadiidka Cirka iyo Dhulka

kh) Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta

d) Wasaaradda Hawlaha Guud

r) Wasaaradda Kaluunka

s) Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha

2) Xoghayanta Guddiga Qaranka ee Farsamada waxay noqon doontaa Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada.

3) Wasiiradu waxay socodsiinta hawlaha caadiga ah u wakiilan karaan Agaasimayaasha Guud ee Wasaaradahooda oo uu Guddoomiye u noqonaya Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada. Waxa kaloo guddigan ka qayb gelaya wakiil ka socda xiriirka Guud ee Ururada Shaqaalaha Soomaaliyeed.

## QODOBKA 70AAD

## XILKA GUDDIGA QARANKA EE FARSAMADA

1) Xilka iyo hawsha Guddiga Qaranka ee Farsamada waxay tahay :-

b) Inuu dejiyo qorshaha imtixaanka xirfadlayaasha;

t) inuu qiimeeyo shahaadooyinka aqoonyahanada iyo farsamayaqaanka;

j) inuu ka qaado shaqaalaha xirfadlayaasha ah imtixaan lagu qiimaynayo aqoonta qof kasta ee xirfadle ah;

x) inuu bixiyo shahaado xirfadle;

kh) inuu dejiyo barnaamijka tababarrada shaqaalaha xirfadlayaasha ah iyadoo lala kaashanayo hirgelinta tababarrada hay'adaha ku shaqo leh.

2) Guddiga Qaraanka waxay kaloo awood u leeyihiin in ay magacaabaan Guddiyo Hoose oo ka kooban dad Farsamo yaqaan ah, si ay imtixaan uga qaadaan dadka xirfadlayaasha ah ee Qaybta Farsamayaqaanka ee sharcigani tilmaamayo.

## QODOBKA 71AAD

## DHAQAN GELINTA SHARCIGAN

Shaqaalaha Farsama Yaqaanka ahi qaybta sharcigan ka sokow waxay u hoggaansamayaan sharciyada shaqaalaha xagga qoritaanka, anshaxa, hawlqabadka, shaqa ka saaridda iwm, oo la xiriira guud ahaan Maamulka Shaqaalaha oo aan lagu xusin qaybta farsamo yaqaanka ee sharcigan.

## QODOBKA 72AAD

## LIISKA FARSAMADA LA AQOON SANYAHAY

1) Magacyada iyo tirada Farsamooyinka ee ilaa hadda la aqoon-sanyahay waa kuwa ku xusan lifaaqa saddexaad ee sharcigan.

2) Hadday soo baxaan farsamooyin aan ku xusnayn lifaaqa saddexaad ee sharcigan marka Guddiga Qarankku hubsado jiritaankaas waxa lagu kordhin karaa liiska farsamooyinka ee sharcigan ku lifaaqaan,

## QAYBTA XI

## BADBAADADA SHAQAALAHA IYO GUNNOYINKA

### QODOBKA 73AAD

### BADBAADADA SHAQAALAHA

Badbaadada Shaqaalaha waxa loo raacayaa sharciga tirsigiisu yahay 49 ee soo baxay 8dii Agoosto 1970 oo ku saabsan Wakaaladda Badbaadada Shaqaalaha iyo wixii beddelaad iyo kordhin lagu sameeyey.

### QODOBKA 74AAD

### GUNNOOYIN

Arrimaha ku saabsan gunnooyinka waxa lagu dhaqi doonaa sharciga tirsigiisu yahay 2 ee soo baxay 5tii Janaayo 1976 oo ku saabsan Gunnooyinka Shaqaalaha iyo wixii beddelaad iyo kordhin lagu sameeyey.

## QAYBTA XII

## HAWLGABKA IYO LIILITIRKA

### QODOBKA 75AAD

### NIDAAM GUUD

1) Nidaamka guud ee hawlgabka iyo liilitirka waa sida soo socota :-

b) Hawlgabka la siinayo shaqaalaha si joogta ah uga hayey xafiis joogta ah shaqada dawladda muddo 20 sano ama in ka badani waa :-

i ) 40% mushaharka asaasiga ah hadduu shaqeeyey 20 sano iyo ka kor laakiin aan gaarin 25 sano;

ii) 50% mushaharka asaasiga ah hadduu shaqeeyey 25 sano iyo ka kor laakiin aan gaarin 30 sano;

iii ) 60% mushaharka asaasiga ah hadduu shaqeeyey 30 sano iyo ka kor.

t ) Shaqaalaha aan muddo hawlgab gaarin laakiin si joogta ah uga hayey xafiis joogta ah shaqada dawladda 10 sano ama in ka badan, waa in la siiyaa, markay shaqada ka joogsadaan, xaq liilitir ah oo ku xisaaban bil mushaharkeeda asaasiga ah sannadka kasta oo ay shaqeeyeen.

2) Muddada lagu mudanayo hawlgabka ama xaqa ku tilmaan xubinta 1aad ee qodobkan waxa laga soo bilaabayaa 1dii Abriil 1950 ama taariikhdii qofku shaqada joogtada ah bilaabay hadba tii dambaysay.

3) Marka sharcigan laga hadlayo «Mushaharka asaasiga ah waxa loola jeedaa mushaharka bileed ee asaasiga ah ee uu qaadanayey markii shaqadu u dhamaatay qofka iyadoo laga reebayo gunnooyinka oo dhan wax kasta ha ahaadeene».

4) Nidaamka Guud ee hawlgabka ee uu sharcigani dhigayo, hay'adaha dawladda xaq looguma yeelan karo wax ka badan hal hawlgab.

Hase yeeshee, haddii ay dhacdo in qof shaqaale ahi, ka dib markii uu qaatay hawlgabkiisii uu dib shaqo dawladeed u bilaabay, waxa muddada shaqadan danbe loo xisaabayaa mid aan joogto ahayn wuxuuna xaq u yeelanayaa liilitir u dhiganta hadba muddada uu shaqeeyey.

1) Haddii waalidiin hawlgabeen ahi ama mutaystey hawlgab ay ku timaado geeriyi caruurta ay ka tagaan waxay xaq u yeelanayaan oo keliya hal hawlgab, ayagoo qaadanaya labada hawlgab kii u badan.

QODOBKA 76AAD

WAAYITAAN HAWLGAB IYO LIILTIR QOFKA SHAQADA LOOGA SAARO ANSHAX AMA XARIG

1) Hawlgab ama liilitir waa inaan la siin sarkaalka shaqada looga eryo sababaha soo socda :

b) tallaabo anshax;

t ) xukun maxkamadeed, haddii lagu xukumo dacwo ciqaab ah taasoo ka dhalatay jagada rasmiga ah oo kafaa'iidaysasho aan sharci ahayn loogu isticmaalo, xatooyo xoolo dadweyne, musuq maasuq, tuugo khiyaamo, iyo dambi kasta oo ka reebaya qofka shaqaalaha ah inuu hayo jago dawladeed;

2) Hase ahaatee, waxa la siinayaa qofka shaqaalaha ah lacagtii uu u bixiyey hawlgab ama liilitir.

QODOBKA 77AAD

SHAQO KA RUQSEYSI

1) Qofka shaqaalaha ah ee iskiis uga ruqsaysta shaqada dawladda lama siin karo hawlgab, hadduusan dhammaysan 25 sannadood oo shaqo dawladeed oo xiriirta amase da'diisu ayan gaarin 50 sannadood. Hase yeeshee, waxa la siin karaa liiltir, hadduu shaqeeyo 10 sano ama in ka badan oo xiriir ah iyadoo lagu siinayo hal bil mushaharkeeda asaasiga ah sannad kasta oo buuxa oo uu shaqeeyey.

2) Qofka shaqaalaha ah ee shaqeeyey muddo ka yar 10 sano, isla markaana si sharci ah looga oggolaaday shaqo ka tegista waxuu xaq u leeyahay in la siiyo lacagtii looga goyn jirey hawlgabka.

QODOBKA 78AAD

MAALIYADDA HAWLGABKA

1) Maaliyadda ku baxaysa hawlgabka shaqaalaha dawladda waxa habaynaysa Wasaaradda Maaliyadda.

2) Maaliyadda hawlgabka waxa lagu maamulayaa Xeer uu soo saaray Madaxweynaha J. D. S. iyadoo uu tixgelinayo talada Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda iyo go'aanka Golaha Wasiirada.

3) Qof kasta oo ka mida shaqaalaha dawladda wuxuu ka bixinayaa boqolkiiba shan (5%) mushaharkiisa asaasiga ah si loogu daro maaliyadda hawlgabka.

4) Dawladdu bii walba waxay ku kordhinaysaa maaliyadda hawlgabka boqolkiiba saddex (3%) mushaharka asaasiga ah ee qofka shaqaalaha dawladda ah. Lacagtaas waxa loogu tala gelayaa madax xigaha ku habboon ee Miisaaniyadda Dawladda, lamana wareejin karo si kharaj kale loogu bixiyo.

## QODOBKA 79AAD

## HAWLGAB NAAFONIMO

1) Haddii qof shaqaale ahi uu shaqada ka fariisto naafo ku gaartey awgeed isagoo fulinaaya howsha loo xilsaaray ama wax la xiriira naafadaas oo ah mid la hubiyey in ay joogto tahay, waxa la siinayaa hawlgab sida qodobka 75aad ee sharcigani sheegayo, inkastoo muddada uu shaqeeyay ka yar tahay 20 sano, iyadoo la tixgelinayo in hawlgabku u kordhayo sida soo socoto :

b) 10% haddii naafadu ka hooseyso 20, ama ay tahay noofo fudud;

t) 20% haddii naafadu u dhaxayso 20% - 35% ama ay tahay naafo dhexe;

j) 70% hadii naafadu ka sareeyso 35% ama ay tahay naafo culus;

2) Ugu badnaan hawlgabka asaasiga ahi marka laga reebo waxa ku kordhaa waa inaanu ka badan 60% mushaharka asaasiga ah; guud ahaanna iyadoo loo geeyey waxa ku kordhay haddii naafo culusi jirto waa inaanu ka badnaan 80% mushaharka asaasiga ah. Heerka ay gaarsiisan tahay naafadu waa inay sugtaa guddiga joogtada ah ee Caafimaadka (standing medical board) oo ay magacaawdo Wasaaradda Caafimaadka. Dadka go'aannada guddigaas ka eed sheeganaya waxay xaq u leeyihiin inay racfaan u qaataan guddiga racfaanka caafimaadka ee joogtada ah (Standing Appellate Medical Board). Go'aanka Guddiga rafcaanka waa kama danbays.

QODOBKA 80AAD

HORUMARIN HAWLGAB

Shaqaaalaha hawlgabku ugu sugnaaday qod. 75aad ama 79aad ee sharcigan, haddii uu qoraal ku codsado, intaanu shaqada ka fariisaan waxa horumarin loo siin karaa ¼ hawlgabkiisa oo lagu dhuftay 120, hawlgabka soo haray oo ah ¾ waxa la siinayaa bil kasta dhamaadkeeda.

QODOBKA 81AAD

QOFKA SHAQAALAHA AH EE SHAQO QARAN KU GEERIYOODA

1) Haddii qofka shaqaale ah oo mutaystay hawlgab welina shaqayneyey uu geeriyoodo, dhaawac gaaray isagoo gudanayaa hawshii loo xilsaaray ama wax la xiriira awgeed, waa in la siiyaa dadkii dhexalkiisa lahaa deeq u dhiganta hal sano mushaharkiisii asaasiga ahaa, caruurtiisana waxay mutaysanayaan xaqa ku tilmaaman qod. 82aad ee sharcigan. Haddiise qofkaasi aannu ka tegin carruur, hase yeeshee ay jiraan waalidiin iyo haweeney aan meel kale wax ka soo gelin, habkii wax lagu siin lahaa waxa lagu gaarayaa go'aan gaar ahaaneed oo uu soo jeediyo Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.

2) Haddii qof shaqaale ah oo jago hawlgab ku jirey laakiin aan weli hawlgab mutaysan uu geeriyoodo, dhaawac gaaray isagoo gudanaya hawshii loo xilsaaray ama wax la xiriira awgeed waxa dadka dhaxalkiisa leh wax lagu siinayaa habka ku tilmaaman xubinta 1aad ee qodobkan.

3) Qof Shaqaalaha dawladeed ahi hadduu ku dhinto xarbi, isagoo gudanaya hawl qaran ama ku dhinto goob dagaal, isagoo daafacaya dalkiisa, waxa lagu xaq siinayaa sida uu dhigayo qod. 19aad xubintiisa 1aad, iyo tan 2aad ee sharciga hawlgabka iyo liiltirka ee Ciidamada Qalabka sida, lambarkiisuna yahay 6 soona baxay 31. 12. 1969.

## QODOBKA 82AAD

## XANNAANADA CARUURTA WAALIDKOOD DHINTAY

1) Haddii qof hawlgabeen ahi dhinto caruurtiisu waxay xaq u leedahay hawlgabkiisa bil walba ilaa ilmaha ugu yari ka gaarayo 18 sano.

2) Qofka shaqaalaha ah ee mutaystay hawlgab welina shaqaynayey hadday ku timaado geeri caadi ah, waxaa caruurtiisa lagu dhaqayaa sida ku xusan xubinta koowaad ee qodobkan.

## QODOBKA 83AAD

## GEERIDA CAADIGA AH EE SHAQAALAHA AAN HAWLGAB LAHAYN

Haddii qof shaqaale ah oo aan hawlgab xaq u lahayni u dhinto geeri caadi ah, dadka dhaxalkiisa lihi waxay xaq u leeyihiin lacag u dhiganta bil mushaharkeeda asaasiga ah sannad kastoo uu shaqeeyey.

## QODOBKA 84AAD

## WAAYITAAN IYO JOOJIN HAWLGAB

1) Haddii qof shaqaale ah oo mutaystay hawlgab ay Maxkamadi ku xukunto xarig isagoo shaqada dawladda ku jira ayna ku caddaadaan dembiyada ku xusan xarafka «T» ee qodobka 56aad ee sharcigan, wuxuu isla markiiba waayayaa xaqa hawlgabka, hase yeeshee waxa loo celin karaa lacagtii hawlgabka looga gooyn jirey.

2) Haddii qof shaqaale ah mutaystay hawlgab, sida sharcigani qorayo, ama hawlgabeen ah lagu xukumo dembiyo liddi ku ah Qarannimada Soomaaliyeed sida ku xusan qaybta 1aad, buugga labaad ee Xeerka ciqaabta, ciqaabtiisuna keeni karto dil, xabsi daa'in ama xarig aan ka yarayn 10 sano, wuxuu isla markiiba waayayaa xaqa hawlgabka.

3) Haddii qof shaqaale ah oo mutaystay hawlgab, sida sharcigani qorayo, ama hawlgabeen ah ay Maxkamadi ku xukunto xarig uga yimid dembi ka duwan kuwa ku xusan xubinta 1aad ee qodobkan keenise karaya shaqo ka reebid muddaysan (temporary interdictions) waxa laga joojinayaa xaqa hawlgabka muddada uu ku sugan yahay xaaladda shaqada ka reebaysa.

## QODOBKA 85AAD

## OGGOLAASHAHA IYO BIXINTA HAWGABKA IYO LIILITIRKA

Marka xiriirka shaqada ee ka dhexaya qofka shaqaalaha ah iyo hay'adda dhammaado, hawlgabka ama liiltirka waxa oggolaanaya Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada iyo Hay'addii uu u shaqaynayey qofka, waxana bixinaysa Wasaaradda Maaliyadda.

## QODOBKA 86AAD

## HAWLGAB *IYO* LIITIR *AAN LA* WAREEJ*IN* KARIN

1) Hawlgabka iyo liiltirka sharcigani xusayo laguma reebi karo cid kale lamana wareejin karo.
2) Hawlgab ama liilitir Maxkamaddu way joojin kartaa deyn ama waxyaabo kale oo dawladdu qofka ku leedahay awgeed. Maxkamaddu waxay amar ku bixin kartaa joojin si loo gudo deyn laga galay dad gaar ah taasoo waafaqsan xeerka madaniga ah.

## QODOBKA 87AAD

## SHAQAALAHA SHAQO DIBADDA AH KU MAQAN

Shaqaalaha dawladeed ee shaqo qaran dibadda loogu diro, haddii ay dhibaato hawshaas loo diray uga timaado, dhibaatadaas awgeedna ay u suurtoobi weydo inuu ku soo noqdo dalka, xaaskiisa ama carruurtiisa waxa la siinayaa mushaharkii uu qaadan jiray ilaa iyo inta uu uga soo noqon karayo dalka ama la hubinayo xaaladiisu sida ay ku sugan tahay.

## QODOBKA 88AAD

## HABAYNTA SHAQAALAHA HAWLGABKAY QAATAAN KA YAR YAHAY KAN SHARCIGANI TILMAAMAYO

Shaqaalaha Hawlgabka ahi, marka sharcigani dhaqan galo, waxay xaq u yeelanayaan hawlgabka sharcigani tilmaamayo, hase-yeeshee, qofka hawlgabkiisu aanu ka yarayn hawlgabka sharcigani tilmaamayo wuxu qaadan karaa hawlgabka uu haatanba qaato.

## QODOBKA 89AAD

## HAWLGAB MUTAYSIGA SHAQAALAHA KU JIRA HEERKA «C» «X» IYO «D»

Shaqaalaha haatan ku sugan heerarka kala ah «C» «X» iyo «D», waxay qaadashada Hawlgabka sharcigan tilmaamayo mutaysan karaan saddex sano ka dib taariikhda sharcigani dhaqan galo.

## QODOBKA 90AAD

## BURIN

Waxa la buriyey sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin sharcigan

## QODOBKA 91AAD

## DHAQAN GELID

Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa 1. 1. 1980.

Sharcigani waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta rasmiga ah ee dawladda.

Muqdisho, 2. 2. 1980

Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA AHNA XOGHAYAHA GUUD EE X. H. K. S.

# LIFAAQA 1AAD

## *SHAXDA* MUSHAHARADDA

### QAYBTA «A» MAAMUL

| | |
|---|---|
| Darajo 1 | 1800 (fixed) |
| Darajo 2 | 1600 |
| | 1500 |
| | 1400 |
| Darajo 3 | 1300 |
| | 1250 |
| | 1200 |
| Darajo 4 | 1160 (fixed) |
| Darajo 5 | 1150 |
| | 1120 |
| | 1090 |
| Darajo 6 | 1060 |
| | 1030 |
| | 1000 |
| Darajo 7 | 920 |
| | 890 |
| | 860 |
| | 830 |
| | 800 |
| Darajo 8 | 720 |
| | 690 |
| | 660 |
| | 630 |
| | 600 |

| | |
|---|---|
| QAYBTA «B» FULIYE | 1060 |
| Darajo 7 | 1030 |
| | 1000 |
| Darajada «8» | 920 |
| | 890 |
| | 860 |
| | 830 |
| | 800 |
| Darajada 9 | 720 |
| | 690 |
| | 660 |
| | 630 |
| | 600 |
| Darajada 10 | 530 |
| | 510 |
| | 490 |
| | 470 |
| | 450 |
| QAYBTA «C» KARAANI | |
| Darajada «8» | 920 |
| | 890 |
| | 860 |
| | 830 |
| | 800 |
| Darajada «9» | 720 |
| | 690 |
| | 660 |
| | 630 |
| | 600 |

| | |
|---|---|
| Darajada «10» | 530 |
| | 510 |
| | 490 |
| | 470 |
| | 450 |
| Darajada 11 | 430 |
| | 410 |
| | 390 |
| | 370 |
| | 350 |

QAYBTA «D» SHAQAALAHA AAN AQOON GAAR LAHAYN

| | |
|---|---|
| Darajada 12 | 430 |
| | 410 |
| | 390 |
| | 370 |
| | 350 |
| Darajada 13 | 340 |
| | 330 |
| | 320 |
| | 310 |
| | 300 |
| Darajada 14 | 290 |
| | 280 |
| | 270 |
| | 260 |
| | 250 |

| | |
|---|---|
| Darajada 15 | 240 |
| | 230 |
| | 220 |
| | 210 |
| | 200 |

## LIFAAQ 2AAD

## SHAXDA MUSHAHAARADA SHAQAALAHA FARSAMA YAQAANKA AH

| | |
|---|---|
| QAYBTA «A» «AY» | FARSAMA YAQAANKA |
| Darajo 1 | 1000X100 — 1800 |
| Darajo 2 | 1000 |
| Darajo 3 | 800 |
| QAYBTA «F» | FARSAMA YAQAANKA |
| Darajo 1 | 1000 X 100 — 1400 |
| Darajo 2 | 800 |
| Darajo 3 | 600 |
| QAYBTA «X» | XIRFADLE |
| *Darajada* 1 | *800 X 100. — 1200* |
| Darajo 2 | 600 |
| Darajo 3 | 450 |
| Darajo 4 | 350 |
| Darajo 5 (Kaaliye Xirfadle Farsame Barad) | 120 |

## HABKA FARSAMAYAQAANADU UGU GUDBAYAAN FARSAMO — YAQAAN DHEXE IYO KAN SARE

| Darajo | Tabab. Shaqo. | Wuxuu noqonayaa |
|---|---|---|
| 1) Farsamo yaqaan | 1 sano 2 sano | F. Dhexe |
| 2) Farsamo Yaqaan | 2 sano | F. Dhexe |
| 3) Farsamo Yaqaan | 3 Sano | F. Dhexe |
| | Tababar Shaqo | wuxu. noq- |
| | 4 Sano | F. Sare |
| | 3 Sano | F. Sare |
| | 3 Sano | F. Sare |

# LIFAAQA 3AAD

## LIISKA FARSAMOOYINKA LA AQOONSANYAHAY

Halkan waxaa ku taxan Farsamooyinka ilaa hadda loo aqoonsaday inay Xeerka Sharciga Farsamooyinka waafaqsanyihiin.

1) FISIKAL SAYNISYAHAN

1) Kimikiste

2) Fisikiste

3) Farsamayaqaanka Cilmiga Fisikada

2) HINDISEYAQAAN DHISMO, INJINEERO IYO FARSAMAYAQAANNADA LA XIRIIRA HAWLAHA

1) Hindise yaqaan iyo Magaalo dejiye
2) Injineer dhismo
3) Injineer Koronto iyo Elektaroonik
4) Injineer Makaanik
5) Injineer Kiimiko
6) Injineer Macdanta Birta
7) Injineer Macdan qode
8) Injineer Warshado yaqaan
9) Dhulsimayaal
10) Nakhshad sameeye iyo guuriye
11) Farsamoyaqaan Injineernimada dhismaha
12) Farsamayaqaan Koronto iyo Elektaroonikada
13) Farsamayaqaan Injineernimada Makaanikada

14) Farsamayaqaan Injineernimada Kiimikada

15) Farsamayaqaan Macdanta Birta

16) Farsamayaqaan qodidda Macdanta

3) MADAXDA DAYUURADAHA IYO MARAAKIIBTA

1) Duuliyayaasha Dayuuradaha, Hogaamiyayaasha Maraakiibta iyo Injineernimada duulista.

2) Madaxda hagayaasha Maraakiibta iyo Dayuuradaha,

3) Injineer Markab.

4) SAYNTIISYADA NAFLEYDA IYO FARSAMAYAQAANADOODA.

1) Sayntiisyada dadka, Dhirta iyo Xoolaha

2) Cayayaanka iyo Farmakoologist

3) Agoronomiste

4) Farsamayaqaanada Sayniska Nafleyda

5) TAKHAATIIRTA DAAWADA, ILKAHA IYO XOOLAHA

1) Takhaatiirta Daawada

2) Takhaatiirta Ilkaha

3) Kaaliye Takhtar

4) Takhaatiirta Xoolaha

5) Kaaliye Takhtar Xoolo

6) Daawo diyaariye

7) Kaaliye daawo diyaariye

8) Cunto yaqaan iyo Nafaqoyaqaanka Caafimaadka Guud

9) Kalkaaliye Aqoonyahan

10) Kalkaaliyayaal farsamayaqaan

11) Ummiliso Aqoonyahan

12) Ummiliso Farsamayaqaan

13) Farsamayaqaanka Indhaha iyo diyaarinta Muraayadda Indhaha

14) Fisiyoterabiste iyo terabiste

15) Farsamayaqaan Raajo

*6)* XARDHAYAAL IYO SAWIRLAYAAL

1) Xardhayaal

2) Filim qaadayaal iyo Sawirlayaal

*7)* BEERALEYDA, XOOLADHAQATADA, SEERALEYDA KALLUUMEYSATADA IYO UGAARSATADA

1) Beeridda Badarka iyo Khodaarta

2) Beeridda Miraha kala geddisan

3) Farsamayaqaanka dhaqidda Xoolaha

4) Farsamayaqaanka Caanaha Xoolaha

5) Tallaalka Beeraha

6) Ku shaqeynta Makiinadaha Beeraha

7) Dhaqaaleynta iyo abuuridda dhirta

8) Kalluumeysiga

9) Dhaqidda Digaagga

*8)* WAX SOO SAARKA IYO KU SHAQEYNTA MAKIINADAHA TACAB SOO SAARKA

1) Qodidda Ceelasha iyo macdanta

2) Fars amayaqaanka Macdanta iyo dhagaxa

*8)* 1. SOO SAARIDDA BIRTA

1) Dhalaalinta birta, Beddelka iyo ku safeynta moofada

2) Ka sameynta birta dhalaalsan qalab

3) Ku dhalaalinta birta moofada

4) Sameynta birta

5) Adkeynta birta

6) Ka sameynta birta tubooyinka iyo xarkaha korontada

7) Macdaneynta qalabka birta iyo dahaaridda (Coaters)

8) 2. DIYAARINTA QORYAHA IYO SAMEYNTA WARQADAHA

1) Farsamada diyaarinta qoriga

2) Miishaareynta qoriga iyo soo saaridda qoriga

3) Xalluufinta qoriga

4) Sameynta warqadaha

8) 3. KU SHAQEYNTA KIIMIKADA

1) Waqiijinta, budeynta iyo qaldada Kiimikada (Grinders & Mixers)

2) Karinta Umadda iyo dab yaqaanka (Roasters iyo heat treaters)

3) Shaandheynta iyo kala soocid-yaqaanka (Filters and separatar operators).

4) Safeynta Batroolka.

8) 4. FARSAMAYAQAANKA MIIQIDDA, FALKINTA IYO KA SHAQEYNTA DHARKA

1) Diyaarinta dunta iyo suufka

2) Miiqidda iyo duubidda dunta

3) Falkinta, Iskugeynta iyo diyaarinta Kaarka naqshadaha

4) Falkinta,

5) Tolidda

6) Sibaaqeynta, Midabeynta iyo dhamaystirka dharka

8) 5. HOODHINTA MAGDHINTA IYO KALA SOOCIDDA SAANTA IYO DHOGORTA

1) Hoodhinta iyo magdhinta

2) Hoodhida dhogorta

8) 6. MAKIINADAHA SAMEYNTA CUNTADA IYO CABIDDA

1) Shiididda Badarka

2) Shiididda iyo Safeynta Sokorta

3) Hiliblayaasha

4) Keydinta Cuntada iyo cabidda

5) Kala miiridda Caanaha, Burcadka iyo Farmaajada

6) Sameynta Burka iyo Nacnaca

7) Sameynta khamiirka iyo Alkolka

8) 7. DIYAARINTA BUURIGA IYO SOO SAARIDDIISA

1) Diyaarinta Buuriga

2) Sameynta Sigaarka

8) 8. DAWARLAYAASHA, DHARTOLAYAASHA, MAKIINADYAQAAN IYO TOLIDDA DHARKA ADAG

1) Dawaarlayaasha iyo dhartoloyaasha

2) Dawaarlayaasha dharka suufka ah

3) Tolidda Koofiyadaha ragga iyo Haweenka

4) Googoynta, nakhshadeynta dharka

5) Tolmayaqaan iyo daabac sameeye

6) Tolidda dharka adag.

8) 9. KABATOLAYAASHA IYO SAMEYNTA SAAMAHA

1) Kabatolayaasha iyo kabo hagaajiyaasha

2) Googoynta kabaha, cabirayaasha iyo gacaan ku tolidda

3) Tolidda qalabka saamaha laga sameeyo.

8) 10. SAMEYNTA ALAABTA GURYAHA IYO FARSAMADA QORIGA

1) Sameynta alaabta guryaha (LOOX)

2) Ku shaqeynta makiinadda qoriga

8) 11. GOOGOYNTA DHAGAXA IYO XARDHINTA

1) Googoynta dhagaxa iyo xardhinta

8) 12. BIRTUMIDDA, QALAB SAMEYNTA IYO KU SHAQEYNTA MAKIINADDA QALABKA

1) Birtumidda, dubeynta iyo moofeynta birta

2) Qalabsameynta, nakhshad sameynta birta iyo birsameynta

3) Ku shaqeynta Makiinadda qalabka sameysa ee iswadda

4) Ku shaqeynta makiinadda qalab sameynta

5) Xoqidda, Xayraynta iyo Afeynta qalabka wax gooya.

8) 13. SAMEYNTA QALABKA CABIRKA, ISKU GEYNTA XUBNAHA MAKIINADAHA IYO MAKIINAD SAMEYNTA

1) Makiinad sameynta, Isugeynta iyo toornada

2) Sameynta Saacadaha (WAAWEYN, YAR — YAR) iyo qalabka cabirka.

3) Sameynta Baabuurta

4) Sameynta Makiinadaha dayuuradaha

8) 14. SAMEYNTA *MAKIINADAHA* KORONTA*DA* IYO ELE-*KTAROONIKADA*

1) Sameynta korontada

2) Sameynta Elektaronikada

3) Isku geynta xubnaha korontada iyo Elektoroonikada

4) Hagaajinta Raadiyaha iyo Raadiyaha Layska arko (TELEEFISHINKA)

5) Geliyayaasha taleefoonada iyo Telegaraafiyada

6) Dhigidda xargaha korontada iyo isku xirka.

8) 15. IDAACA*DDA* IYO Q*A*LABKA CO*DK*A DH*EEH*EEYA

1) Farsamayaqaanka Idaacadda.

2) Farsamayaqaanka qalabka dhawaaqa iyo Filim wadayaasha

8) 16. TUUBISTE ALXAANLE, SAFEEXADYAQAAN BIRDHISMO

1) Tubiste iyo dhuunyaqaan

2) Alxanle iyo ololkujare

3) Safeexadyaqaan

4) Bir dhismo diyaariye iyo dhise

8) 17. DAHABLE IYO *MA*CDI*N* KA SHA*Q*EEYE

1) Dahable, qalin iyo macdin tume.

8) 18. QURAARAD SAMEYNTA

1) Quraarad sameeye Gooye, Xaquuqe iyo dhammeystire

2) Sameynta dhoobada iyo qalab xaquuqa

3) Moofeynta qoraaradda iyo Jeeramikada

4) Xardhidda quraaradda

5) Rinjiyenta iyo nakhshadeynta qaruuradaha

*8) 19. SAMEYNTA CINJIRKA IYO CAAGA*

1) Sameynta cinjirka iyo caagga

2) Sameynta lugaha cinjirka iyo caagga.

8. *20* SAMEYNTA WARQADAHA IYO KAARTOONADA

1) Sameynta sanduuqa waraaqaha iyo kaartoonada

8) 21. DAABACAADDA

1) Diyaarinta xuruufta daabacaadda (GACANTA IYO MAKIINADDA)

2) Ku shaqeynta makiinadaha daabaca xaashiyaha safeexadaha iyo kuwa la xiriira

3) Sameynta safeedaha daabaca ah (STEREOTYPERS AND ELECTYPERS)

4) Xardheynta sawirka

5) Xardhinta qalabka daabaca

6) Sameynta jaldiyada buugagga, Wargeysyada iyo daabicidda xuruufta waaweyn

7) Daabaca midibyada, filimada iyo sawirka.

*8) 22. RIJIYE (RINJIYE)*

1) Rinjiye dhisme

*8) 23.* WAX SOO SAARKA

1) Sameynta iyo hagaajinta qalabka muusikada

2) Tolidda kolayada iyo xaaqimaha

3) Sameynta shubka waxyaalaha kala geddisan.

*8) 24.* FUUNDIGA, INJINEERKA IYO DHISMAHA

1) Leban-dhigaha, dhagax dhisaha iyo mar—mar dhigaha

2) Diyaarinta shubka, dhammeystirka shamiitada

3) Saqaaf sameeye (FOORERS)

4) Najaarnimo iyo qoryo isku hagaajiye

5) Gidaar salaaxe

6) Gelinta gidaarka qalabka, dhuumaha iyo qaboojiyaha

7) Quruuradeynta albaabada iyo daaqadaha

8) Dhismaha

*8)* *25.* MAKIINA*D*AHA ABUURI*DD*A *K*ORONTA*DA*, B*I*YO KARIYA*HA* *I*YO TA*LA*AJADAHA

1) Makiinadaha qaybinta xoogga korontada, neefta iyo biyaha

2) Makiinadaha ceelasha biyaha

8) 26. MAKIINADAHA SOO SAARIDDA SHIXMADDA

1) Ku shaqeynta makiinadaha rogidda iyo raridda

2) Hagaajinta keebalada iyo ku shaqeynta makiinadaha waxjiida,

3) Makiinadaha carro guridda

4) Ku shaqeynta Wiishaashka iyo Kareenada

*8)* *27.* GAA*D*II*D*KA

1) Hagaajinta Makiinadaha Maraakiibta

2) Hagaajinta iyo wadidda Kareenada

3) Wadidda Baabuurta

4) Hagaajinta Makiinadaha Baabuurta

*8)* *28.* HAWL

1) Cunto kariye

2) Safaynta dharka iyo kaawiyadeynta

3) Timo hagaajiye iyo xiire

4) Dab damiye.

# SAXID QALAD

Qodobka 59aad ee Sharciga Shaqaalaha Dawladda Tir. yahay 5 soona baxay 2.2.80; cinwaanka halkii uu ka ahaa «Maamulka Farsamayaasha» waxaa loo saxay «Maamulka Farsamayaqaanada

Qodobka 60aad Cinwaanka halkii uu ka ahaa «Maamulka Farsamayaqaanka» waxaa loo saxay «Darajooyinka Farsamayaqaanada.

Bogga 264aad ee isla Sharciga Shaqaalaha Dawladda, lifaaqa 2aad halka ku qoran Farsamayaqaanka oo ku aadan qabta «A» waxaa loo saxay Aqoonyahaanka.,Xisaabta ku hoos qoran oo kala ah: 1000X100-1800, waxaa loo saxay 1200X100-1800.